URURKA WARBAAHINTA NABADDA
&
HORUMARINTA SOOMAALIYEED

XEERKA ANSHAXA SAXAAFADDA

Drafted by: SOMEPED

Dec, 2010

Xeerkan Anshaxa Saxaafaddu waa qoraal qabyo ah oo wax laga bedeli karo marka la dhaqangeliyo islamarkaana, la qiimeeynayo saameyntiisa. Sidaa daraadeed waxaa dib loo eegayaa sanadkiiba hal mar, si wax looga bedelo ama loogu kordhiyo iyadoo la eegayo hadba daruufaha taagan.

Horudhac

Qeybaha kala gedisan ee warbaahintu waxaa saaran waajibaad looga baahanyahay inay meel mariyaan kaasoo ah habka ugu sareeya ee anshaxa laga doonayo xirfadle warbaahineed. Xeerka howleed ee ku xusan hor u dhacan iyo qeybaha danta guud (public interest) ee ay ugu horeyso qodobkiisa 1aad ayaa waxay dejinayaan hanaanka anshaxa ilaalinaya xuquuqda shakhsiga iyo tan ay bulshada guud ahaan u leedahay inay wax ogaato. waana gun dhigga xeerka gaarka ah ee warbaahinta (Media self-regulation) ee maanta Suxufiyiinta soomaaliyeed garowsatey inay tahay mid lagama maarmaan ah.

Xoriyadda Warbaahintu (Freedom of the press), waa mid aan la kala dhantaali karin lehna xuquuq iyo waajibaad la mid ah midka aas-aasiga ah ee ay bulshadu u leedahay in la wargeliyo islamarkaana loo ogolaado xornimo ay dadku afkaartooda ku baahiyaan iskuna dhaafsadaan. Sidaa daraadeed waa muhiin in xeerkan loo karaameeyo si xushmad leh, islamarkaana aan loo fasirin hab khaldan ama horseedi kara in xeerkan uu hakad geliyo hab sami u tebinta arimaha danta guud ee bulshadu ay ku jirto.

Hadaba waa masuuliyadda tifaaftireyaasha, Hay'adaha Warbaahinta iyo Maamulayaashooda inay meel mariyaan xeerkan kuna dabbaqaan xeerarka faafreeb ee iyaga u gaarka ah. Waa inay si adag u dhowraan dhamaanba qeybaha kala gedisan ee maamuleyaasha, tifaaftireyaasha, Saxafiyiinta iyo dhinacyada kale ee dibadda ka ah warbaahinta.

Qod-1. **Danta Guud (Public interest)**

W***axaa dhici karta in wax laga bedelo ama lagu soo kordhiyo qodobada hoose, hadii loo arko inay danta guud kamid yihiin ama ay wax u dhimayaan***.

Danta guud waxaa kamid ah:-

A. Ilaalinta Diinta, Dhaqanka, Fayo dhowrka dadweynaha iyo badbaadadooda.

B. Ogeysiinta ama soo shaac bixinta dembiyo ama wax is dabamarin la sameeyay si waafaqsan anshaxa wanaagsan ee warbaahinta.

C. ka ilaalinta bulshada in lagu marin habaabiyo fal ama war uu shakhsi ama urur uu soo saaro.

D. In la dhowro danta guud xitaa ay ka hor imaanayso xoriyadda hadalka.

E. Hadii ay dhacdo in la isku qabto/ wax la iska weydiiyo arimaha danta guud, gudiga warbaahinta madaxa banaan waa inuu ka dalbadaa tifaftireyaasha iyo madaxda qeybaha warbaahinta inay si buuxda u cadeeyaan qodobka la isku qabtey.

F. Gudiga kumeel gaarka ah ee Warbaahinta wuxuu dib u eegayaa tirada qodobada horey uga mid ahaa danta guud ee ku xusan xeerkan iyo waxyaabaha ku soo kordhaya.

G. Arimaha la xiriira caruurta da'doodu ay ka hooseeyso 15 sano, waa in tifaaftireyaasha iyo madaxda qeybaha warbaahintu muujiyaan masuuliyad dheeri ah oo la xiriirta danta caruurta.

Qod-2. Xaqiiqda (Acuracy)

A. Warbaahintu waa inay ka feejignaataa islamarkaana baahinin xog/warbixin aan xaqiiq ahayn, marin habaabin ama hal dhinac ah, hadii ay ahaan lahayd Sawiro, Video ama cod la duubey intaba.

B. Warbixin xaqiiqda ka fog, mid wax marin habaabinaysa amaba hal dhinac ah hadii la ogaado in la baahiyay waa in laga cudur daartaa si deg-deg ah. Hadii ay suurtagal tahay, warbaahinta ku lugta leh waa inay bedeshaa oo dib u baahisaa warbixintii oo sax ah iyadoo hadii loo baahdana raali gelin ka bixinaysa.

C. Warbaahintu iyadoo xor u ah inaysan dhinacna taageerin, waa inay si qayaxan u kala saartaa faalooyinka, male awaalka iyo runta. Runta ayaa mararka qaar suurto gal ah in si qaloocan loo fasiro, balse warbaahintu waxaa la gudboon xili walba inay soo gudbiso xog xaqiiqo ah, iyadoo la ceddeeynayo hadii warbixinta aysan ku saleysnayn xaqiiqda islamarkaana ay salka ku hayso afkaar, eedeymo, kutiri-kuteen ama aaminaad gaar ah.

D. Hay'adaha warbaahintu waa inay si wanaagsan oo xaqiiqo ah u tebiyaan natiijada fal la xiriira meel ka dhac ay iyagu qeyb ka yihiin hadii uusan jirin heshiis ay dhinacyada gaareen oo joojinaya arintaasi.

E. Saxafiyiintu waa inay isticmaalaan caddeymo si ay u xaqiijiyaan run ahaanshaha xogta ay ka helaan ilahooda wararka.

F. Hay'adaha warbaahineed waa inay si cad dhegesytayaashooda ugu kala soocaan farqiga u dhexeeya, xayeesiinta/ xayeysiinta faallooyinka qaabkooda leh (advertorial) iyo warka.

Qod-3. Fursadda Ka jawaabista (Opportunity to reply)

A. Saxafiyiintu waa inay xaqiijiyaan sheekooyinkooda inay noqdaan kuwo wanaagsan oo isku dheelitiran. Waa in la goobaa aragtida la xiriirta mowduuca warbixin xasaasi ah kuna saleysan dhaliil, ka hor intaan la daabicin. waa in laga baaqsadaa arintan hadii warbaahintu haysato sababo macquul ah oo muujinaya in baaris noocaas ah ay keeni karto in cadeymihii la burburiyo ama marqaatiyadii la cabsi geliyo kadibna warbixintii la baahin waayo.

B. Waa in la bixiyaa fursad wanaagsan oo jawaab celineed xiliga ugu horeeya ee ay suurta gasho, hadii ay dhacdo in la tebiyay xog aan xaqiiqo ahayn.

Qod-4. Nolosha hoose ee qofka (Privacy)

A. Ruux waliba wuxuu xaq u leeyahay in la tixgeliyo noloshiisa hoose ee gaarka ah ,tan reerkiisa, gurigiisa, caafimaadkiisa iyo fariimihiisa ay ka midka yihiin kuwa isgaarsiinta casriga ah (digital communications). tifaaftireyaasha iyo madax wareerdyaduna waa inay sabab u helaan marka ay faro gelinayaan nolosha gaarka ah ee qof uu leeyahay hadii aysan ogolaansho u haysan.

B. Dadka masuuliyadda u haya bulshada waxay xaq u leeyihiin inaan la faro gelin noloshooda gaarka ah.

C. Hadii qof uu masuul ka yahay xafiis dadweyne/ ka shaqeeynayo arimaha dadweynaha, ama si weyn howlihiisa aawadeed qofkaasi u soo jiitey warbaahinta, in la daabaco ama la tebiyo faahfaahin dheeri ah oo la xiriirta noloshiisa gaarka ah ee hoose waxay noqon kartaa mid cudur daar leh, hadii xogta laga tebinayo ay tahay mid ku saabsan sharci ahaanshaha howsha qofka, run ahaanshaha hadalada ruuxaasi jeediyo ee ku wajahan bulshada iyo qiimeynta aragtidiisa ku saabsan danaha dadweynaha.

D. Waa wax aan la aqbali karin in sawiro laga qaado, filim laga duubo ama cod laga duubo shaqsiyaadka ku sugan meelo u gaar ah hadii aysan iyagu ogolaanin.

E. Meelaha gaarka ah waxay noqon karaan mararka qaar, goobo gaar loo leeyahay ama meelo dadka ka dhexeeya balse ay ka jirto arin keeni karta nolol qof u gaar ah.

Qod-5. Dhibaateyn (Harassment)

A. Saxafiyiintu waa inaysan ku lug yeelan cabsi gelin,dhibaateyn iyo dabagalka ruux aan raali ka ahayn ama weydiistey in laga haro.

B. Saxafiyiintu waa inaanay ku adkeysan su'aal weydiinta, teleefon gareynta, fariin u dirista, dabagalka, sawiro ka qaadista ama filim ka duubista shaqsiyaadka, mar hadii ay weydiistaan in laga joojiyo; sidoo kale waxaa saxafiyiinta ka mamnuuc ah inay ku sii sugnaadaan goobtaasi hadii la weydiisto inay ka tagaan. waxaa intaasi ka soo hari kara marka daba galku uu la xiriiro dan guud ama qof eedeysane ah oo la xukumay.waana marka danta guud ay tahay midda sareysa.

C. Maamulayaasha, tifaaftireyaasha iyo madaxwareedyada Soomaliyeed, waa inay xaqiijiyaan in qawaaniintan ay ku dhaqmaan kuna adkeeyaan howl wadeenadooda kale.

Qod-6. **Carqaladeynta qof ay musiibo ku dhacdey (Intrusion into grief or shock)**

A. Arimaha la xiriira qof niyad jab uu haysto ama musiibo ku dhacdey, su'aalaha la weydiinayo iyo farsamooyinka la adeegsanayo waa inay ahaadaan kuwo ku saleysan u dhimrin iyo naxariis. xogta laga helaana waa in loo maareeyaa si xasaasi ah.

Qod-7. **Caruurta (Children)**

A. Saxafiyiinta, tifaftireyaasha iyo madax wareedyadu waa inay tixgelin siiyaan nuglaanshaha caruurta sidaa daraadeedna mar waliba maanka lagu hayaa da'da qofka wax laga tebinayo. Hadii xitaa waalidka caruurta ama qof kale oo weyn oo xigto la ah ogolaansho looga haysto tebinta arimaha qofka aan qaan gaarka ahayn, waxaa weli muhiimadeeda leh in laga eego xasaasiyadda iyo daruufaha jira ee ka dhigi karta sheekada mid dan guud ay ku jirto.

B. Caruur da'dooda ay ka hooseeyso 15 sano waa inaan sawiro laga qaadin ama laga wareysan oo cod looga duubin qodobo la xiriira arimihiisa gaarka ah ama arimo caruur kale, illaa waalid ka masuul ah ama xigto qaan gaar ah ay ogolaansho bixiso.

C. Ardeyda waa inaan sawiro looga qaadin ama loogu tegin goobaha wax barashada dhexdooda hadii aan ogolaansho laga heysan masuuliyiintooda

D. Tifaaftireyaasha iyo madax wareedyada waa inaanay u adeegsan maqaamka, sharafta ama xumaha waalid ku sifoobeen inay wax uga qoraan ama uga tebiyaan nolosha gaarka ah ee caruurta.

Qod-8. **Cusbitaalada (Hospitals)**

A. Saxafiyiintu waa inay is sheegaan islamarkaana ogolaansho ka helaan qof masuul ah ka hor inta aysan gelin goobaha gaarka ah ee cusbitaalada gudahooda ah iyagoo arin daba galaya, hadii aysan markaasi casuumaad ka helin qofka bukaanka ah qudhiisa oo ay ku arkayaan isaga amaba aysan u yeerin xigtada dhow ee bukaanka.

Qod-9.**Tebinta arimaha denbiyada (Reporting of Crime)**

A. Ehelada ama saaxiibada dadka la xukumay ama dembi lagu soo oogey waa inaan guud ahaanba la sheegin magacyadooda oo la shaacinin illaa ogolaansho laga heysto iyaga.waxaase la cadeyn karaa oo keliya marka ay ahmiyad weyn oo gaar ah ay u leeyihiin sheekada.

B. Waa in tixgelin gaar ah la siiyaa hadii caruur ay qeyb ku yeeshaan sheekada, sida hadii ay marqaati ahaan ku soo galaan amaba ay dhibane dembi yihiin. Balse arintan waa inaanay xanibin xaqa loo leeyahay tebinta dacwadaha sharciga ah.

C. Taxadir dheeri ah iyo masuuliyad gaar ah waa in ay warbaahintu adeegsataa marka wax laga sheegayo fal waxashnimo ah, qalalaase ama arin la xiriirta gumaad.

Qod-10. **Adeegsiga Aaladaha qarsoon iyo Khayaanooyinka (Clandestine devices and subterfuge)**

A. Warbaahintu waa inaanay baadi goobin helitaanka xog iyadoo la dhegeysanayo teleefoonada dadka, la dhexgelayo fariimaha electroonikada amaba la jabsanayo xogta gaarka ah ee qof ku keedsadey qalabka casriga ah iyadoon ogolaansho loo haysan.

B. Saxafiyiintu waa inay si qayaxan isu sheegaan si degdeg ah marka ay yeelanayaan wada sheekeysi ay ku jiri karto xog loo adeegsan karo warbixin la baahinayo.

C. Isticmaalka kaamiradaha qarsoon (Hiden Cameras) iyo dhegeysiga aaladaha goobaha guud iyo sidoo kale ku dhaqaaqista Khayaano ay ka mid tahay adeegsiga dad kale, waxaa keliya si guud loogu sababeyn karaa marka ay dan guud ku jirto islamarkaana qalabkaasi aan sinaba qaab kale loogu adeegsan karin.

Qod-11. **Heyb kala sooc (Discrimination)**

A. Warbaahintu waa inay ka fogaataa adeegsiga sifeynta aan wanaagsanayn ee liidaya sharafta qofka, dhibaateeynayana dadnimadiisa la xiriirta isirkiisa, midabkiisa, dhalashadiisa, xanuuno haya, arimaha guurkiisa, awoodiisa, amaba cimrigiisa.

B. Waa in laga fogaadaa faahfaahinta laga bixiyo qof midabka jirkiisa, isirkiisa, dhalashadiisa (oo ay ku jirto jinsiyadda uu haysto), asalkiisa, lab iyo dhedig waxa uu yahay, arimaha guurkiisa, awoodiisa, caafimaadkiisa, ama cimrigiisa hadii aysan muhiimad weyn oo gaar ah aysan u lahayn sheekada.

C. Si kastaba ha ahaatee, meelaha ay munaasabku tahay islamarkaana danta guud ay ku jirto, warbaahintu waa inay tebisaa islamarkaana qeexdaa fikradaha ku saabsan waxyaabaha kor ku xusan.

Qod-12. **Kicinta/Abuurista Neceyb (Incitement to Hatred)**

A. Warbaahintu waxay xaq u leedahay waajibna uu ka saaranyahay inay tebiso kana faalleyso dhamaanba arimaha sharciga ah ee danta dadweynuhu ku jirto, balse xuquuqdan iyo waajibaadku la socdo waa inay noqdaan kuwo dheelitiran, marka ay timaado masuuliyadda ah inaan la tebinin ama la daabicin waxyaabo dhalin kara naceyb.
B. Tifaaftireyaasha iyo madax wareedyadu waa inay ka taxadaraan marka ay go'aan ka qaadanayaan sida loo tebiyo dhacdooyinka la xiriira qudbad naceyb xambaarsan lagana fogaado baahinta macluumaadka ay xambaarsan tahay oo dhan.

C. Qudbadaha naceybka xambaarsan wuxuu xeerkan ku qeexayaa kuwa ujeedkoodu yahay:- naceyb, handadaad, aflagaado, ama luqad meel ka dhac ah taasoo hor seedeysa xad gudub weyn oo faquuq ah.

Qod-13. **Ilaha qarsoodiga ah (Confidential sources)**

A. Saxafiyiintu waxaa saaran waajibaad anshaxooda la xiriira oo ay ku ilaalinayaan ilahooda qarsoodiga ah ee ay xogta ka helaan.

B. Waxaa sidoo kale waajib ku ah inay qaadaan talaabooyin dhaxal gal ah oo ay ku xaqiiqsanayaan nafsad ahaantooda in ilo wareedyadani ay ahaadaan kuwo war gal ah, lehna ulajeedooyin aan guracneyn islamarkaana xogta ay bixiyaan ay tahay mid sax ah.

C. Shuruud kasta oo lagu xiro balanqaad la sameeyay si loogu bedesho xog, waa in la cadeeyaa balanqaadyada la sameeyayna waa inay ahaadaan kuwo la ilaaliyo.

D. Ilo wareedyada waa in la shaaciyaa marka ay muuqdaan ama ogolyihiin, marka ay tahay inaan la shaacinin waa in sharaxaad laga bixiyaa sababta. Dadku waxay xaq u leeyihiin inay helaan xog dhameystiran oo laga soo xigtey ilo lagu kalsoonaan karo kuna yar tahay weydiisashada balanqaad la xiriira in la qariyo.

Qod-14. **Cinwaanada iyo cinwaan hoosaadyada (Headlines and captions)**

A. Cinwaanada, cinwaano hoosaadyada iyo faahfaahinta la raaciyo gebi ahaanba waxyaabaha ay warbaahintu tebiso waa inay si sax ah u gudbiyaan waxa ay ka hadleyso warbixinta, sawirka ama muuqaalka vidiyooga ee ay la xiriiraan.

Qod-15. **Sawirada iyo Muuqaalada Video (Photos & video footage)**

A. Tifaaftireyaasha iyo madax wareedyadu waa inaanay daabicin, oo baahinin sawiro, muuqaal video ama cod la duubey kuwaasoo aan dadka loogu gudbinaynin xaqiiqda.

B. Xaaladaha caloolyowga ama naxdinta, waa in tixgelin gaar ah la siiyaa dareenka kuwa ay dhibaatadu ku habsatey.

C. Qaadista sawiro, filim duubis ama cod dadka ku sugan goobahooda gaarka ah iyagoo aan ogolaansho laga helin waa waxaan la aqbali karin illaa ay jiraan arimo dan guud ah oo baneeynaya in lagu dhaqaaqo falkaasi.

Qod-16. **Dano Dhaqaale (Conflict of Interest)**

A. Saxafiyiintu waa inay ka madax banaanyihiin masuuliyad walba oo ku xanbaareysa dan gaar ah oo aan ahayn midda guud ee masuuliyaddu ka saran stahay taasoo ah, xaqa dadku ay u leeyihiin inay wax ogaadaan. Hadii saxafigu ku lug yeelanayo siyaasad amaba uu ka mid noqonayo kooxaha bulshada iyo kuwa la midka ah, waa in lagu wargeliyaa Tifaaftiraha iyo Madaxwareedka.

B. Aqristayaashu/dhegeystayaashu/daawadeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay xogta ka dhex helaan go'aanka rasmiga ah ee tifaftiraha/madax wareedka ama saxafiga ee ma ahan in koox dan gaar ah lihi ay sheekadu meeriso oo sameeyn ku yeelato. Hadii dane dhaqaale oo baaxad leh uu sheekada ugu jiro xarunta warbaahineed ama saxafiga, waa in la shaaciyaa. Saxafiyiintu waa inay ku wargeliyaan tifaftireyaashooda ama madax wareedyadooda hadii uu jiro dano dhaqaale.

Qod-17. **Arimaha Faafreebka (Editorial matters)**

A. Qeexidda xorta ah ee afkaaraha waa mid lama taabtaan ah, waana arinta marnaba muran la gelin karin ee la xiriirta howsha warbaahinta xorta ah.

B. Maqaalada aragtida qofka ah iyo faalooyinka ayaa sidoo kale waxay yihiin kuwo mudan in xaqiiqda dhabta ah ka tarjumaan sida war tebinta caadiga ah sida ka muuqata qodobka labaad ee xeerkan.

Qod-18. **Minguurinta iyo Xuquuqda Daabacaadda (Plagiarism &copyright)**

A. Xarumaha warbaahintu waa inaanay isticmaalin erayo,sawiro, ama muuqaallo ay leedahay xarun kale oo warbaahineed ama shaqsi iyadoo aanay jirin heshiis labada dhinac ah ama ogolaansho, ka hor intaan la isticmaalin agabkaasi.

B. Xuquuqda daabacaadda ee uu leeyahay maqaal, sawir, war la duubey ama filim waa in la xifdiyaa. Ku xad gudub xuquuq daabacaad oo ku dhacdey si aan ula kac ahaynse waa in loo maareeyaa si dhimrin ku jirto, si ka duwan sida loo maareeyo xad gudub bareer ah.

Qod-19. **Bogagga Isku xirka Bulshada (Social Networking Sites)**

A. Agab laga heley shabakad isku xirta bulshada in la daabaco ama la baahiyo iyadoo aan ogolaansho loo haysan waxay keeni kartaa qodob la xiriira ku xad gudubka arimaha gaarka ah ee uu qof leeyahay (privacy).

C. Saxafiyiintu/tifaftireyaashu iyo madax wareedyadu waa inay ogaadaan ka hor inta aanay isticmaalin agabkaasi inuu yahay mid gaar loo leeyahay; sida loogu ogolyahay in qeyb sedexaad isticmaali karto, hadii qofka iska leh uu ka xanibey xogtaasi dad kale inay isticmaalaan iyo haddii uu xogtaasi ay quseyso mowduuc la xiriira qof aan qaan gaar ahayn (Caruur).

B. Islamarka tifaftiruhu ama madax wareedku gaaro go'aanka uu ku daabacayo ama ku baahinayo agabkaasi laga soo qaatey shabakadda isku xirka bulshadu, wuxuu/waxay xambaareysaa masuuliyadda wixii ka yimaadda macluumaadkaasi iyo qaabka lagu heley intaba.

Qod-20. **Waxyaabo isku dhafan (Miscellaneous)**

A. Saxafiyiintu waa inay bartaan qiimaha dhaqankooda u gaarka ah iyo waxyaabaha ay rumeysanyihiin, laakiin marka ay noqoto inay war tebiyaan waa inaysan dhaqankooda ku dabbaqin dadka kale. Arintan waxaa laga reebayaa marka ay tahay in wax laga qoro ama la baahiyo faalo ku saleysan aragti qof ama urur gaar ah uu leeyahay, ama xarunta warbaahineed ay bartilmaameedsanayso suuq gaar ah.

B. Saxafiyiintu waa inay si gaar ah ay u feejignaadaan marka ay wax ka tebinayaan ilo wareedyada aan khibradda lahayn ama la wareysto. Tusaale ahaan, haduu qof da'yar ama qof da'weyni ay warbaahintu la hadlayso markiisii ugu horeysay, saxafiga hadii la weydiisto inuu u sheego xogta uu doonayo inuu tebiyo, waa inuu u cadeeyaa.

Qod-21. Xeerka Anshaxa Warbaahinta Soomaaliyed (Somali Media Code of Ethics)

A. Xeerkan anshaxa warbaahintu waa qoraal qabyo ah oo wax laga bedeli karo marka la dhaqangeliyo islamarkaana la qiimeeynayo saameyntiisa. Sidaa daraadeed waxaa dib loo egayaa sanadkiiba hal mar, si wax looga bedelo ama loogu kordhiyo iyadoo la eegayo hadba daruufta taagan. Waxaa isbedel lagu sameyn karaa oo keliya iyadoo ay si wadajir ah u ogol yihiin saxiixeyaashii hore ama kuwa iyaga bedeley.